

MAXAAD SAMAYN KARTAA HADDII AAD KU NOQDAY DHIBANE NACAYB / DHACDO NACAYB AH?

Xaaladda Degdegga ah had iyo jeer
wac 999/112

- Ku soo wargeli Dembiga Nacaybka Saldhigga Garda ee deegaankaaga. Diiwaanka Saldhigga Garda oo buuxa ayaa laga heli karaa www.garda.ie
- La xiriir khadka qarsoodiga ah ee Garda: **1800 666 111**
- U adeegso Adeegga Onlineka Warbixinta Dembiyada Nacaybka Garda ee www.garda.ie
- Booqo www.garda.ie maclumaad dheeraadi ah oo ku saabsan:
- Dembiyada Nacaybka / Dhacdooyinka Nacaybka
- Ka hel Sarkaalka Kaladuwanaanta Garda ee deegaankaaga www.garda.ie

#LETSTOPHATETOGETHER

Qayb ay maalgeliso (Booliska)
Sanduuqa Amniga Gudaha ee
EU



Garda Síochána
Ilaalinta Amaanka Dadka

DANBIGII NACAYBKA WAA MID AAN LA OGALEEYN



**GALI GOOBTAADA FAAHFAA-
HINTA SALDHIGA/ISTEESHINKA
EE HOOS**

MAGACA SALDHIGA/ISTEESHINKA:

LAMBARKA TALEEFONKA: _____

LAMBARKA TELEFOONKAAGA
ILAALINTABULSHADA: _____

**SARGAALKA KALA DUWANAANTA EE
GARDA**

MAGACA: _____

LAMBARKA TALEEFONKA: _____

MAAMULAHA SARE

MAGACA: _____

LAMBARKA TALEEFONKA: _____

Qeybta Kala-duwanaanta & Is-dhexgalka
Guud ee Garda
diversity@garda.ie
01-6663150



Soo warbixi waxii Dambi
Nacayb ah hadda

WAA MAXAY DAMBIGA NACAYBKA?

Dambiga nacaybku wuu ka duwan yahay noocyada kale ee dambiyada maxaa yeelay adiga ayaa laga dambi galayaa adiga oo ah qofka aad tahay ah. Waa weerar shaqsi ah oo adiga kugu saabsan oo aadan badali karin ama aysan aheyn inaad bedesho, sida midabkaaga, jinsiyadaada, lab ama dhedig, diintaada, jinsiyada aad kahesho, iwm.

Dembiyada waxaa ka mid ah Weerar, Dhaawac Danbiyeed, Dhibaateyn iyo Dambiyada Amarka Dadweynaha. Waa inaad u soo sheegtaa Dembiyada Nacaybka An Garda Síochána.

Qeexitaannada

Garda Síochána waxay leedahay qeexitaano ku saabsan Dembiyada Nacaybka iyo sidoo kale Dhacdooyinka Nacaybka Aan Dembiyada ahayn (hadda ka dib loo yaqaan 'Dhacdooyinka Nacaybka').

Dembiyada Nacaybka:

Dembi kasta oo u arko dhibanaha ama qof kale inuu, gebi ahaan ama qayb ahaan, ku dhiirrigeliyo cadaawad ama nacayb, oo ku saleysan da'da ama la dareensiyo naafonimo, midab, dhalasho, jinsi, diin iyo nooca jinsigada kahelitaanka.

Dhacdada Nacaybka:

Dhacdo kasta oo nacayb ah oo qofkasta u arko, gebi ahaan ama qayb ahaan, in lagu dhiirrigeliyo cadaawad ama nacayb, oo salka ku haya da 'dhab ah ama garasho, curyaanim, jinsi, midab, dhalasho, jinsi, diin, u janjeedh galmo ama jinsi.

Kuwani waa dhacdooyin aan u dhigmi karin fal dambiyeed laakiin ma aha kuwa ka waxyeello yar ileen wa kuwa qofka ka xanaajiya. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah Ku Xadgudubka Afka(cayda), Cagajuglaynta, Waxyaabaha Xadgudubka ah ama Dhaqdhaqaaqyada iyo Ku Xadgudubka Internetka Kuwani waa inaad ku wargelisaa An Garda Síochána.



YAA NOQON KARA DHIBANAHA NACAYBKAASI?

Qof, bulsho ama hay'ad ayaa dhibbane u noqon kara Nacaybka. Haddii aad la kulantay ficil gacan ka hadal ah, cabsi gelin ama cadaawad taasi oo lagugo soo gaarsi-naayo sida aad tahay darteed, waxaa laga yaabaa inaad dhibbane u ahayd Dembi Nacayb.

Haddii aadan hubin in waxa kugu dhacay ay yihiin Dembi Nacayb / Dhacdo ,warbixin nagasii waxaan qaadi doonnaa tallaabada lagama maarmaanka ah.

HALKEE KA DHACI KARAA DANBIYADA / DHACDOOYINKANI NACAYBKA?

Dembiyada Nacaybka / Dhacdooyinka nacaybka waxay ka dhici karaan meel kasta: waddada, dukaanka ama baararka, shaqada, iskolka, internetka ama guriga.

MAXAY KA QABAN KARTAA GARDA SÍOCHÁNA?

Garda Síochána si dhab ah ayey uqaadaa Dembiyada Nacaybka / Dhacdooyinka nacaybka. Waxaan ku siin doonaa jawaab deg deg ah oo dhameystiran dhammaan warbixinnada aanu helno.

Dembiyada Nacaybka:

Waxaan u baari doonnaa dhammaan warbixinnada ku saabsan Dembiyada Nacaybka si dareen iyo xushmad leh.

Dhacdada Nacaybka:

Waxaan diiwaangelin doonnaa dhammaan Dhacdooyinka Nacaybka oo waxaan qaadi doonnaa tallaabo, sida ugu habboon, xaaladaha jira.



Istaraatiijiyadaha Kaladuwanaanta Garda iyo Istaraatiijiyadda hadda ayaa laga heli karaa in aad soo dajisato 14 af oo kala ah cinwaankan www.garda.ie